



WANAAJINTA DARIIQA BELL STREET

Mashruuca Wanaajinta dariiqa Bell Street (Bell Street Improvements) waxaa lagu aburi doonaa xiriir bilaa dhibaato ah oo u dhexeeya Belltown iyo qaybta qarka biyaha ee Seattle Waterfront waxaana gelitaanka ama gaaritaanka loogu wanaajin doonaa dadka da' walba ah. Mashruucu waxuu u kala gudbayaa labo sakadood oo ku yaalla dariiqa Bell St, oo u dhexeeya dariiqyada Elliott avenue iyo 1st avenue.

Hawlaha wanaajinta waxaa mudnaan lagu siinayaa badbaadada, gelitaanka iyo dhaqdhaqaaqa dadka lugaynaya iyo baaskiil wadeyaasha. Mashruucu waxuu meesha ku soo dari doonaa jid baaskiil oo isku gudba oo dhawran, waxuu ballaarin doonaa geesyada waddada ee lug lagu maro, waxuu kordhin doonaa kuraasta lagu daawan karo gacanka Elliott Bay iyo qarka biyaha ee Seattle Waterfront waxuuna kordhin doonaa dhirta ku taxan wadiiqada labada sakadood. Mashruuca waxaa weliba qayb ka ah kaabadda astaanta Alaskan Way Viaduct ee taariikhiga ah, kaasoo la iftiimin doono oo loo adeegsan doono marin laga galo xaafadda Belltown.



Muuqaalka qorshaysan ee dariiqa Bell St, marka bari laga eego isgoyska dariiqyada Bell St iyo Western Ave.



Kaabadda astaanta Alaskan Way Viaduct ayaa habeenkii la iftiimin doonaa waxaana loo adeegsan doonaa taallo ama bartilmaameed, oo booqdeyaasha loogu soo dhawaynayo xaafadda la wanaajiyey iyo sidoo kale Belltown.


JADWALKA MASHRUUCA

Waxaan annagu saadaalinaynaa in dhisidda la bilaabi doono bartamaha Janaayo 2025 oo ay qaadan doonto qiyaas ahaan lix bilood si loo dhammeeyo.



Seattle
Office of the Waterfront
and Civic Projects


HABAYNTA CUSUB EE DARIIQA



*Kalagooyaha dhirta leh waxuu u kala dhexeyn doonaa 1 foot ilaa 8.8 fiit taasoo ku xiran bannaanka diyaarka ah

Mashruucu waxuu dariiqa Bell St ka saari doonaa layn baabuurta maraan si bannaan loogu sameeyo meelo dheeraad ah oo ay maraan baaskiillada iyo dadka lugaynaya. Ma jiri doonaan meelo baabuurta la dhigto oo u dhexeeya dariiqyada Elliott avenue iyo Western avenue. Meelaha baabuurta la dhigto ayaa loo dayn doonaa dhinaca koonfurta ee dariiqa Bell St ee u dhexeeya dariiqyada Western avenue iyo 1st avenue.

MAABKA WAREEGGA BAABUURTA IYO BAASKIILLADA



Mashruucu waxuu u kala gubayaa labo sakadood oo ku yaalla dariiqa Bell St, oo u dhexeeya dariiqyada Elliott avenue iyo 1st avenue. Dariiqa Bell St waxaa weli hal dhinac loogu socon doonaa dhanka bari inta u dhexeysa dariiqyada Elliott avenue iyo Western avenue waxaana hal dhinac loogu socon doonaa dhanka galbeed inta u dhexeysa dariiqyada Western avenue iyo 1st avenue. Seenyaaleyaal baaskiil oo cusub ayaa lagu dari doonaa dariiqa Bell St barta isgoyska Western Ave.

SU'AALO?

info@waterfrontseattle.org
206.499.8040

**BOOQO BARTAYADA
INTERNETKA**
waterfrontseattle.org



Seattle
Office of the Waterfront
and Civic Projects